

## Waqtiga fasaxa Xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada iyo cudurka COVID-19 -- Su'aalaha Badanaa Nala Waydiiyo iyo jawaabahooda Waxaa la cusbooneysiisay 4-8-2020

Shirkadaha iyo shaqaaluhu waxay qayb ka qaadani karaan ilaalinta badbaadada iyo caafimaadka bulshada ayagoo xaqiijinaaya in shaqaaluhu adeegsadaan Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada (PSST)! Dukumiintigaan waxa uu ka jawaabayaa su'aalaha aad ka qabi karto sharciga Seattle ee Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada. Fadlan booqo webseetka [Office of Labor Standards \(Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha\)](#) si aad u hesho xog dheeraad ah oo faahfaahsan.

Xeerka Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada:

- Wuxuu difaacaa caafimaadka dadwaynaha asagoo xaqiijinaaya in shaqaalaha iyo carruurta guriga joogaan, aysana u dhawaan shaqaalaha kale, dugsiga, iyo macaamiisha markay xanuunsan yihiin
- Wuxuu abuurayaa goobo shaqo oo wax soo saar badan asagoo yaraynaaya faafida cudurka
- Wuxuu dhisayaa amaan dhaqaale waayo shaqaaluhu waxay daryeeli karaan caafimaadkooda ayagoon waayin mushaarkooda

Ma qabtaa su'aal aan lagu xusay Su'aalaha iyo Jawaabaha kor ku qoran? Booqo webseetkeena [Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada](#), waxaadna wici karaa 206-256-5297, ama si electaroonig ah ayaad lagula soo xariiri kartaa:

- Shaqaalaha doonaya inay soogudbiyaan su'aalo ama cabashooyin—waxay codsigooda kusoo gudbin karaan [oonleen ahaan](#) ama waxay iimayl kusoo diri karaan [workers.laborstandards@seattle.gov](mailto:workers.laborstandards@seattle.gov).
- Shaqaalaha doonaya inay soogudbiyaan codsiyada caawimaada farsamada—waxay codsigooda kusoo gudbin karaan [oonleen ahaan](#) ama waxay iimayl kusoo diri karaan [business.laborstandards@seattle.gov](mailto:business.laborstandards@seattle.gov).

---

**Macluumaad Cusub oo Muhiim ah! 8 dii Abriil, 2020**, Xaafiiska Halbeega Shaqada ayaa soo saaray **sharci Kumeel gaar ah, oo degdeg ah** kaas oo wax ka badelaaya nooca caddeynta ee ay shirkadu codsan karto inta lagu jiro xanuunkaan aafada ah ee COVID-19. Laga bilaabo hada illaa bisha 7 da Juun, 2020 shirkadu ma codsan karto dukumiintiga daryeel bixiyaha caafimaadka si ay caddeyn ugu sameyso isticmaalka PSST. Taas badelkeed, haddii shirkadu doorato inay codsato caddeyn, shirkada markaas waxaa qasab ku ah inay keento hab caddeyn oo kale. Xasuusin: shirkaduhu ma codsan karaan caddeynta maqnaanshaha haddii ay tahay saddex bari iyo wax kasii yar. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waqtiga, caddeynta la oggolyahay, iyo sharcigaan, booqo [webseetkeena](#) ama fiiri [Su'aalahaheena iyo Jawaabaheena Balaaran](#).

**Cusub!** Sharcigaan waxaa wax laga badelay bishii Maarso 16, 2020. Waxyaabahaas laga badelay waxay dhaqan galeen Maarso 18, 2020. Dukumiintigaan waa laga cusboonaysiiyay si waxyaabaha la badelay ugu jiraan.

### Waa maxay Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada (PSST)?

Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada waa waqtiga fasaxa ay shirkad mushaarka ku bixiso kaasoo shaqaaluhu u adeegsadaan:

- Si ay u daryeelaan naftooda ama xubnaha qoyskooda ee xanuunsan, dhaawacma, ama xaalad caafimaad qaba
- Si ay ayaga ama xubnaha qoyska u tagaan dhakhtarka una helaan daryeel caafimaad iyo mid ka hortag
- Marka saraakiisha caafimaadka dawlada ay kula taliyaan shaqaalaha inay iskarani tiilaan
- Marka la xiro meelaha daryeelka iyo iskuulada ay dhigtaan xubnaha qoyskooda
- Marka goobtooda ganacsiga ay xiraan saraakiisha dawlada sababo la xariira caafimaadka
- Shirkadaha shaqaalahooda gaaraayo 250 ama wax kabadan shaqeyana waqti buuxa aduunka oo dhan: marka goobtooda ganacsiga loo xiro arimo la xariira caafimaadka iyo badqabka

### Maxay shaqaaluhu ka helaan PSST?

Gudaha Seattle, sharciga ayaa ka doonaaya shirkadaha loo shaqeyo inay siiyaan dhammaan shaqaalaha Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada. Shaqaalahaan waxaa ku jira kuwa sida buuxda u shaqeyya, kuwa nus maalinka shaqeyya, kuwa ku meel gaarka ah, kuwa gaarka ah, iyo shaqaalaha caadiga ah.

### PSST meeqa dhan ayay helaan shaqaaluhu?

Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada waxaa lagu helaa saacadaha shaqada dheeraadka ah. Cadadka ayaa ku xiran inta saacadood ee shaqaaluhu shaqeyo iyo xajmiga ganacsiga shirkada uu u shaqeyyo. Si aad u hesho faahfaahin, booqo webseetka [Office of Labor Standards \(Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha\)](#).

Macluumaadka lagu sheegay dukumiintigaan waxaa looguma teela galin in loo isticmaalo tilmaamo sharci mana ahan in loo isticmaalo sharci iyo xeer ahaan.

Dib loo eegay: 04/08/2020

### **Meeqa PSST ah ayuu shaqaale qaadan karaa halkii mar?**

Shaqaaluhu waxa uu adeegsan karaa mid uun ama dhammaan saacadaha uu kaydaday iyo kordhinada yar ilaa cadadka ugu yar waqtiga shirkadu kula socoto waqtiga shaqada (laakiin aan ka badnayn saacad).

### **Sidee ayuu shaqaale ku helayaa isku dheeli tirnaanta PSST giisa?**

Shirkaduhu waa inay la wadaagaan xogtaan mar kasta oo ay mushaarka baxshaan. Shirkado badan ayaa xogtaan ku qora risiidyada mushaarka ama kusoo qora nidaamka mushaar bixinta oo oonleen ah.

### **Shaqaale ma adeegsan karaan PSST haddii goobtooda shaqada ay xiraan saraakiisha dawlada sabab la xariirta suuragalnimada in cudur faafa sida COVID-19?**

Haa, Marka la eego daruufahaan soosocda:

- Dhamaan shirkadaha waxaa qasab inay shaqaalaha u ogaalaadaan inay qaataan PSS haddii goobtooda shaqada ay saraakiisha dawlada u xireen arimo la xariira caafimaadka.
- Shirkadaha shaqaalahoodu gaaraayo 250 ama wax kabadan shaqeeyana waqti buuxa oo u dhigma kan aduunka oo dhan: waxaa qasab ah in shaqaalaha loo ogolaado inay qaataan PSS hadii hawlaha goobtooda shaqada ay isdhimaan ama loo xiro arimo la xariira caafimaadka iyo badqabka Xiraanka ma ahan inay soojeediyaan ama ay amraan saraakiisha dawlada.

### **Yaa ah sarkaal dawladeed?**

Sarkaal dawladeed waa shaqaale dawladeed kaaso awood loo siiyay inuu xiro ganacsi ama dugsi. Kuwaan waxaa ku jiri kara saraakiisha heer deegan, heer gobal, iyo heer federaal iyo saaraakiisha caafimaadka dadwaynaha (tusaale, Seattle - Waaxda Caafimaadka ee Degmada King, Center for Disease Control (Xarunta Ka hortaga Cudurka), ama State Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Gobalka) maamulaha guud ama maamulaha dugsi dawladeed.

### **Shaqaaluhu ma isticmaali karaan PSS haddii la xiro *meelaha daryeelka iyo iskuulada ay dhigtaan xubnaha qoyskooda***

Haa. Shaqaaluhu waxa uu isticmaali karaa PSS haddii la xiray meelaha daryeelka iyo iskuulada ay dhigtaan xubnaha qoyskooda. Kahor isbadelka la sameeyay Maarso 2020, shaqaalaha waxay isticmaali karaan PSST marka booska xanaanada daryeelka ee *ilmaha* ay xiraan saraakiisha dawlada ee arimaha la xariira caafimaadka. Hadda shaqaaluhu waxa uu isticmaali karaan PSS haddii la xiray meelaha daryeelka iyo iskuulada ay dhigtaan *xubin kamid ah* qoyskooda. Sidoo kale, sharcigu mar danbe uma baahna in xiritaanku noqdo mid la xariira arimo caafimaad ama amar ay bixiyeen saraakiisha dawlada.

### **Yaa uma qalma xubin katirsan qoys ahaan?**

Xubnaha qoyska kamidka ah waa ilmaha, waalidka, xaaska, shaqsi guriga ka diiwaangashan, awoowa iyo ayeeyada, ilmaha ay dhalaan waalidka ilmihisa, ama walaalaha.

### **Shirkaduhu ma waydiin karaan faahfaahinta ku saabsan, ama sababta shaqaaluhu, u codsanaayo inuu adeegsado PSST?**

Maya. Shaqaalaha lagama doonaayo inay u sheegaan shirkada sababta ay u adeegsanayaan PSST. Shirkadaha loo shaqeeyo ayaa codsan kara caddeyn ku aadan in isticmaalka PSST uu ahaa isticmaal la oggolaaday kadib wax ka badan saddex maalmood oo isku xigxiga ahna kuwa shaqada oo lagu qaatay PSST. Shirkadaha waxaa laga yabaa inaysan waydiin qaabka loo isticmaalaay. Fadlan fiiri [Su'aalaheena iyo Jawaabaheena dhamayska tiran](#) hadii aad dooneysid macluumaad dheeraad ah.

### **Goorma ayay shirkadu shaqaalaha waydiin kartaa inay caddeeyaan adeegsiga PSST?**

Kadib marka ay maqnaadaan saddex bari, shirkadu waxay u baahan kartaa dukumiinti ku saabsan in siwaditaanka PSST ay muhiim tahay. Shaqaalaha loogama baahna inuu caddeeyo sida uu u isticmaalo, kaliya waxaa laga doonayaa inuu sharaxo in adeegsiga uu adeegsanaayo uu yahay mid sharci ah. [Shirkadu ma ahan inay codsato caddeyn](#) waxaan shirkadaha ku dhiirigelinaynaa inay noqdaan waqtigaan kuwo furfuran sida ugu macquulsan.

Si aad u ogaatid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caddeynta iyo sharciyada ku saabsan kharashaadka caddeynta, fadlan booqo [Su'aalaheena iyo Jawaabaheena dhamayska tiran](#).

### **Ma ka dooni kartaa shaqaale inuu adeegsado PSST?**

Maya. Shirkaduhu kuma qasbi karaan shaqaalaha inay u adeegsadaan PSST maqnaansho qaab kale uu u fasaxaayo sharcigu.

### **Shirkadu ma ku qasbi kartaa shaqaalaha inuu guriga aado marka uu jiran yahay?**

Sharciga PSST kama mamnuucaayo shirkada inay shaqaale u dirto guriga sabab cudur awgeed. Sharciyada kale ee gobalka ama deegaanka ayaa go'aamin kara inay sharci tahay ama ay shardi tahay in qof loo diro guriga. Tusaale ahaan, sharciyada Waaxda Caafimaadka ayaa ka doonaaya shirkada inay shaqaalaha ka shaqeeya adeegga cuntada guriga u dirto haddii uu qabo astaamaha matag ama dhuun xanuun Macluumaadka lagu sheegay dukumiintigaan waxaa looguma teela galin in loo isticmaalo tilmaamo sharci mana ahan in loo isticmaalo sharci iyo xeer ahaan.

Dib loo eegay: 04/08/2020

qandho wata. Wixii xog dheeraad ah, arag [Washington Administrative Code \(Xeerka Maamulka ee Washington\) 246-215](#) ama la xariir [Seattle-King County Public Health Department \(Waaxda Caafimaadka ee Seattle-Degmada King\)](#).

### **Shirkadu ma ka hor istaagi kartaa shaqaale inuu shaqeeyo sabab la xariirta inuu u safray wadan cudurku ka dilaacay?**

Socdaalka lagu aado wadan ama gobal gaar ah maaha cadayn la isku halayn karo oo muujinaysa in qofku qabo cudurka COVID-19. Ma jirto koox gaar ah oo masuul ka ah ama ay tahay in lagu beegsado sabtida faafida cudurka COVID-19. Xog ku aadan sida looga hortago iyo sida looga jawaabo fikradaha qaldan iyo faafida xogta beenta waxaa laga heli karaa [halkaan la gujiyo](#). Qaadista talaabo khaldan oo shaqo oo salkeedu yahay isirka shaqaalaha ama wadanka uu kasoo jeedo waxay keeni kartaa dacwada isir kala sooca. Wixii xog dheeraad ah, la xariir [Office of Civil Rights \(Xafiiska Xaquuqaha Madaniga ah\)](#) oo aad ka helayso 206-684-4500.

### **Maxaa dhacaaya haddii shaqaale uu adeegsado dhammaan PSST giisa kaydka u ahaa ama shaqaale cusub oo aan lahayn wax waqti fasax oo u kaydsanaa uu fasax qaato?**

Shirkada waxaa kaliya laga doonayaa inay shaqaalaha siiso adeegsiga saacadaha PSST ga ee uu kaydsaday. Ayagoo kaashanaaya garaadkooda, shirkaduhu waxay bixin karaan waqtiga fasaxa mushaarka lagu baxiyo oo dheeraad ah ama waxay ogolaan karaa adeegsiga fasaxa nasiinada ama fasaxyada kale ee kaysan. Sharciyada kale ayaa ka dooni kara shirkada inay shaqaalaha siiso fasax; ayna ku jiraan: Family and Medical Leave Act (Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka), Washington State Paid Family Medical Leave (Fasaxa Mushaarka lagu baxiyo ee Qoyska iyo Caafimaadka ee Gobalka Washington), sharciyada federaalka, kuwa gobalka, iyo kuwa maxaliga ah ee naafada.

Bishii Maarso 18, 2020, Dawlada maraykanka waxay meel marisay sharci degdeg ah oo laga yaabo in qaar kamid ah shaqaalaha ay helaan fasaxa xanuunka arimo la xariira cudurka COVID-19 xataa haddii uu shaqaaluhu uusan lahayn fasaxa PSST ee kaydsan. Sharcigaan waxa uu dhaqan galayaa marka la gaaro ama inta lagu gudo jiro Abriil 2 deeda, 2020. OLS waxay cusbooneysiin doontaa Su'aalaha iyo Jawaabaha maadaama uu jiro macluumaad cusub.

### **Shaqaaluhu ma ugu deeqi karaa waqtiga PSST oo uusan isticmaalin qorshaha ku deeqista fasaxa mushaarka lagu qaato si uu u caawiyo shaqaalaha la shaqeeya ee u baahan PSST?**

Haa, haddii shirkadu leedahay barnaamij hawshaan ogol. (Ma jiro sharci qasab ka dhigaaya.)

### **Shaqaalaha qasab may ku tahay inuu helo qof daboolaa saacadaha uu u baahan yahay PSST?**

Maya. Shirkadu kuma qasbi karto shaqaale inuu keeno qof daboolaa saacadaha uu ku maqan yahay fasaxa PSST.

### **Shaqaaluhu ma isku badalan karaa tookooyinka shaqada halkii uu ka adeegsan lahaa Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada?**

Haa. Haddii labadaba shirkada iyo shaqaaluhu ku heshiiyaan, shaqaaluhu waxa uu badalan karaa tookada shaqada halkii uu ka qaadan lahaa PSST.

### **Shaqaalaha Seattle Public Schools (SPS, Dugsiyada Dadwaynaha ee Seattle) ma ku jiraan Sharciga Seattle ee Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada?**

Maya. Laakiin, qaar kamid ah shaqaalaha SPS waxaa dabooli kara sharciga Washington State Paid Sick Leave (Fasaxa Mushaarka lagu baxiyo ee qofka xanuunsan ee Gobalka Washington). Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan difaacyada gobalka, booqo: <https://lni.wa.gov/workers-rights/leave/paid-sick-leave/>.

### **Shaqaaluhu ma u adeegsan karaa PSST sababo ka baxsan kuwa sharcigu difaacaayo?**

Haa. Shirkadu waxay u ogolaan kartaa shaqaalaha adeegsiga PSST ay u adeegsadaan sababo aan ka ahayn kuwa sharcigu amraayo.

### **Yaan wici karaa haddii aan su'aalo badan ka qabo xaquuqdayda ama waajibaadkayga ku cad sharcigaan?**

Fadlan wac [Seattle Office of Labor Standards \(OLS\)](#) oo aad ka helayso [206-256-5297](tel:206-256-5297) ama booqo websetkeena oo aad ka helayso <http://www.seattle.gov/laborstandards>. Waxaan ka jawaabi karnaa su'aalaha waxaana bixin karnaa xog!

### **Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah oo kusaabsan cudurka COVID-19 (oo horay loogu yaqaanay novel coronavirus) iyo talaabooyinka aan qaadi karo si aan ugu diyaar garoobo?**

Booqo websetka Public Health – websetka Seattle & King County [iyo xaashida xogta](#) ee ka hadlaysa COVID-19, oo ay ku jiraan [Su'aalaha badanaa la lswaydiyo oo balaaran](#) iyo sidoo kale talooyin ku aadan u diyaar garoowga cudurka ee bulsho waynta, dugsiyada, goobaha shaqada, iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo kuwo kale oo badan.

**Cusub!** Booqo bogaan webka si aaad [ula socotid macluumaadka bulshada uu saameeyay cudurka Covid-19.](#)

Macluumaadka lagu sheegay dukumiintigaan waxaa looguma teela galin in loo isticmaalo tilmaamo sharci mana ahan in loo isticmaalo sharci iyo xeer ahaan.

Dib loo eegay: 04/08/2020